



## Sida Loo Buuxiyo Foomka Gargaar Dhaqaale

<b>Sharaxaad Qayb</b>	<b>Faahfaahin</b>
Magaca Bukaanka	Magaca Bukaanka (fadlan xuruuf kala go'an ku qor)
Taariikh Dhalasho	Taariikhda Dhalasho ee Bukaanka
Adrees	Adreeska Bukaanka ee Hadda (fadlan xuruuf kala go'an ku qor)
Lambar Diiwaan Caafimaad	Isticmaalka Xafiiska Kaliya
Bukaanku ma ahaa qof degan Ohio wakhtigii adeegga?	Ku jawaab haa ama maya. Deganaansho waxa yeesha qof si ikhtiyaar ah ugu noolaa Ohio wakhtiga adeegga cisbitaalka, oo aan kaalmada dawladda ka qaadan gobol kale isla markaana aan Ohio u iman kaliya inuu ka helo adeegyo daryeel caafimaad.
Bukaanku ma haystay Caymis Caafimaad wakhtigii adeegga?	Ku jawaab haa ama maya. Haddii ay haa tahay, fadlan soo raaci koobi ah kaadhkaaga caymiska ama inshuuranka.
Bukaanku ma ahaa qaate Medicaid wakhtigii adeegga?	Ku jawaab haa ama maya. Haddii ay haa tahay, fadlan soo raaci kaadhkaaga Medicaid.
Taariikhda Adeegga Cisbitaalka	Taariikhda (ama taariikhda galidda) ee bukaanka lagu arkay cisbitaalka.
Dadka ka Tirsan Qoyska	Qor liiska magacyada dadka qoyska ee ka tirsan qoyska soke oo aad adigu KU JIRTID (bukaanka), xaaska ama sayga/ninka bukaanka (ee ku nool ama aan ku noolayn guriga), caruurta bukaanka ee ka yar 18 sanno (ee bukaanku dhalay ama korsanayo) ee guriga kula nool bukaanka. Haddii bukaanku yahay qof aan qaangaadhin, labada waalid ee ilmaha dhalay waa in labadaba lagu qoro codsiga (haddii ay guriga nool yihiin iyo haddii kaleba).
Taariikh Dhalasho	Taariikh dhalasho ee ee qof kasta oo ka tirsan qoyska.
Waxa la Isu Yahay Bukaanka	Qor waxa qofkan iyo bukaanku isu yihiin. Tusaale: Bukaanka (oo ah aniga), Xaas/Say, Ilmo (la dhalay ama la korsanayo) ama Waalid (haddii bukaanku aannuu ahayn qaangaadh).
Isku-darka Dakhliga la helay gudaha saddexdii (3) bilood KA HOREEYAY taariikhda adeegga	Gali qadarka dakhliga GUUD ee qof kasta helay gudaha 90-kii maalmood ee ka horeeyay taariikhda adeegga. Haddii aannu jirin dakhli la helay gudaha 90-kii maalmood ee ka horeeyay, gali 0. <i>Tusaale: Taariikhda adeeg 4/1/12 – inta uu yahay dakhliga la helay 1/1/12 illaa 3/31/12</i>
Isku-darka Dakhliga la helay gudaha laba iyo tobankii (12) bilood ee KA HOREEYAY taariikhda adeegga	Gali qadarka dakhliga GUUD ee qof kasta helay gudaha 12-kii bilood ee ka horeeyay taariikhda adeegga. Haddii aannu jirin dakhli la helay gudaha 12-kii bilood ee ka horeeyay, gali 0. <i>Tusaale: Taariikhda adeeg 4/1/12 – inta uu yahay dakhliga la helay 4/1/12 illaa 3/31/12</i>
Meesha Dakhliga Laga Helay	Qor magaca shaqo-bixiyaha ama meel kale oo dakhli ka soo galay qofkan. Waxa tan ku jiri doona gargaarka shaqo-la'aanta (unemployment), Social Security, VA, beshada hawlgabka (pensions), iwm.
Taariikh Bilaabis / Siin Shaqo	Qor taariikhda bilaabista ama siinta shaqaddan, ama taariikhda anfacyadu ama gargaarku bilaabmay sida gargaarka shaqo-la'aanta, Social Security, hawlgabka, iwm.
Haddii aad soo sheegtid dakhli ah \$0, fadlan bixi sharaxaad kooban oo sheegaysa sida aad dhaqaale ahaan u soo noolaatay.	Sharaxa wixii aad ku noolayd 3-dii iyo 12-kii bilood ee ka horeeyay taariikhda adeegga. Haddii aad taageero ka heshay qof kale, fadlan qofkaas ka keen warqad sheegaysa mudada uu ku taageeray iyo nooca taageero ee uu ku siiyay (sida cunto, hoy, iwm.). Fadlan sidoo kale qofkaas ha soo saxeexo oo ha soo taariikheeyo warqadda.
Saxeexa Codsadaha	Waa in codsiga uu saxeexo bukaanku, xaaska/sayga bukaanka, waalidka (haddii bukaanku aannu qaangaadh ahayn) ama wakiil sharci (soo raaci koobiga cadeynta Awoodda Wakiilnimo).
Taariikh	Waa in codsiga lagu qoro taariikhda la buuxiyo.
Waxa la Isu Yahay Bukaanka	Sheeg waxa qofka saxeexay codsiga uu u yahay bukaanka (haddii aannu bukaanku saxeexin).
Lambarka Teleefonka	Lambarka teleefonka ee bukaanka (oo uu ku jiro furaha aagga)

*Fadlan soo raaci koobiyada cadeynta dakhliga ee 3-dii iyo 12-kii bilood ee KA HOREEYAY taariikhda adeegga. (Ha soo dirin waraaqo asal ah sababta oo ah lama soo celin karo)*

*Fiiro-gaar ah: Hubi in lambarka teleefonkaagu uu ku yaalo dusha dhammaan waraaqaha la soo raaciyo codsiga*

*Codsiga lama saxeexi karo oo lama taariikheyn karo wax ka badan 7 maalmood ka hor taariikhda adeegga.*